



**Stanley J. Bahorek, Treasurer/CFO**

**Office of the Treasurer**

270 E. State Street  
Columbus, Ohio 43215

Ph. 614-365-6400

Fax 614-365-5628

[sbahorek@columbus.k12.oh.us](mailto:sbahorek@columbus.k12.oh.us)

---

*Mission: Each student is highly educated, prepared for leadership and service, and empowered for success as a citizen in a global community.*

---

1-da Sebteembar, 2022

Qoysaska Ardayda Dugsiga Magaalada Columbus ee qaaliga ah:

Dugsiyada Magaalada Columbus waxay qiimeeyaan daacadnimada iyo sharafta/hufnaanta. Waxaa naga go'an inaan kobcino heerarka anshaxa sare oo aan kor u qaadno hab-dhaqanka xoojinaya kalsoonida dadweynaha iyo kalsoonida sharafta/hufnaanta shaqadeenna.

Tignooloojiyadda ayaa noo suurta gelisay in aan siino adeegg heer sare ah oo ku haboon qoysaskeena iyada oo sidoo kale koobaysa/xaddidaysa khataraha la xiriira/xidhiidha maaraynta lacagta caddaanka ah ee degmadeena. Waxaan rabnaa inaan hubinno inaad ka warqabto qaar ka mid ah waxyaabaha muhiimka ah ee la sameeyo iyo waxa aan la sameyn karin markaad gudbineyso lacag bixinta.

**SAMEE (DO):**

- Ku bixi lacagaha/khidmadaha ardayga iyada oo loo marayo Xarunta/Xaramka Furan ee (Infinite Campus).
- U diyaargarow inaad u-adeegsato Heerka Maxalliga/gudaha ee ah munaasabadaha/dhacdooyinka [ay ku jiraan, laakiin aan ku koobnayn/ku xaddidnayn, munaasabadaha/dhacdooyinka ciyaaraha fudud, ciyaaraha/riwaayadaha, lacag ururinta, iwm.]. Heerka Maxalliga ah waa adeegga tigidhada dhacdooyinka onlayn-keena ah.
- Codso rasiid/warqad caddayn ah haddii aad ku bixinayso lacag caddaan ah.

**HA SAMAYNIN (DON'T):**

- Ha samaynin inaad jeegagga lacagta udhiibo shaqaalaha
- Lacagaha ha ku dirin hababka Lacag bixinta arjiyada ee (Pay Apps) [sida Venmo, Zelle, Paypal, iwm.].
- Ha ku dirin lacag-bixinta adiga oo adeegsanaya lacagta danabaysan (cryptocurrency) [sida Bitcoin, Tether, iwm.].

Haddii mid ka mid ah shaqaalaha CCS uu ku weydiiyo inaad u qorto jeegg qof-ahaaneed/shakhsi ahaaneed ama aad u soo dirto lacag-bixinnada adiga oo adeegsanaya ab-ka lacag-bixinta (pay app)/ee ah lacagta danabaysan (cryptocurrency), fadlan la xiriir maamulaha dugsigaaga, ama wac Xafiiska Lacag hayaha/Khasnajiga ee ah (614) 365-6400.

Haddii aad ka shakisan tahay qiyaano sharci-darro ah ama xad-gudubka, fadlan wac khadka teleefoonka ee bilaashka ah adiga oo garaacaya (833) 320-0099, halkaas oo aad ka heleyso dad xifad-layaal u-tababaran, madax-bannaan oo kaaga jawaaba wicitaanka 24-saac maalintii, toddobada maalmood ee toddobaaka. Soo wacayaasha waxaa loo dammaanad qaadayaa amaano/sir ah oo waxay dooran karaan inay noqdaan qarsoodi.

Mar labaad, yoolkeennu/ujeedkeennu waa inaan siino adeegg wanaagsan/xoogan qoysaskeenna annaga oo yareynayna khataraha la xiriira/xidhiidha maaraynta/wax ka qabashada lacagta caddaanka ah ee dhismayaasha.

Si daacad ah,

Stanley J. Bahorek, Lacag-hayaha/Khasnajiga/madaxa maaliyadda,CFO